



# Guddigu wuxuu shaaca ka qaaday dadaallada la dagallanka maandooriyaha, naafanimada, cudurka dyslexia

Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyadda Guud ee Portland, kulankoodii asbuucii hore, wuxuu ku dhawaaqay Oktoobar inay tahay bisha wacyigelinta degmada ee saddexda goobood ee caafimaadka iyo badqaabka, iyadoo loo adeegsanayo munaasabadda in lagu muujiyo dadaallada degmada ee lagu taageerayo ardaydeena hab caddaalad ah.

Dhawaaqidda iyo dadaallada degmada:

## **Oktoobar waa Bisha Wacyigelinta Waxyeelada Maandooriyaha**

Codbixin 7-0 ah, waxay Guddiga meel mariyeen sharciga cusub oo gooni-gooni ah oo ku saabsan isticmaalka maandooriyaha iyo khamriga, iyagaa oo ka saaraya sharciga guud ee edbinta.

Sharciga cusub, ee loo yaqaana "[Healthy, Substance Free Learning Environments,](#)" wuxuu ku daraa waxqabadyada ugu wanaagsan ee qaran ahaan loo aqoonsan yahay ee diirad saarta dejinta ciqaabta ugu yar marka lala barbardhigo tan "dulqaadka eberka" ee sanadihii hore.

"Isbedeladda waxaa loogu tala galay in lagu daro hab mudnaanta siinaysa jawi taageera ardayda oo hubiya in ardayda ay helaan xulashooyinka daaweynta ee ku haboon," Agaasime Rita Moore ayyaa tiri

Marka laga soo tago sharciga cusub, waaxda Guusha & Caafimaadka Ardayda waxay wax ka qabanysaa isticmaalka maandooriyaha iyo khamriga iyo balwadda iyadoo bixinaysaa daryeel joogto ah, oo leh ilo joogto ah oo lagu cusbooneysiyo [websaydhkeeda](#), iyo lataliyayaasha daroogada iyo khamriga iyo taageerada caafimaadka maskaxda ee dugsiyada sare.

Degmadu waxay sidoo kale iskaashi la sameynaysaa Regence iyo Maamulka Caafimaadka ee Oregon oo ku saabsan deeqaha iyo adeegyada ka-hortagga, iyo in tababaridda macallimiinta K-5, kooxaha taageerada ardayda iyo kulamada macluumaadka.

"Waxaan sii wadnaa inaan si adag uga shaqeyno sidii aan u jebin lahayn dhaleeceynta la xiriira isticmaalka maandooriyaha iyo balwadda," ayay tiri Brenda Martinek, Madaxa Adeegyada Taageerada Ardayda.

## **Oktoobar waa Bisha Wacyigelinta Naafanimada**

Maalinta Oktoobar 29, degmada waxay qoysaska ku hadasha afka Isbaanishka u qaban doonta tababarka [Individualized Education Plan](#) (IEP), waxaan lagu qaban doonaa Dugsiga Hoose ee Rigler. IEP waa barnaamij la habeyey si lagu hubiyo in ardayga naafada ah uu helo tilmaamo gaar ah iyo adeegyo la xiriira. Tababarada ayaa xaqijjin doona in qoysaska ku hadasha afka Isbaanishka ay si siman u helaan caawimaad.

Maalinta Noofeembar 6, PPS waxay qoysaska degmada oo idil u qaban doontaa tababar gudaha Dugsiga Sare ee Grant oo ku saabsan fahamka nidaamka IEP.

Maalinta Desembar 6, degmada waxay marti-galin doontaa daawashada filimka [“Intelligent Lives,”](#) filin dhab ah oo u sameeyay Dan Habib, filim sameeye ku guulaystay abaalmarin. Filimka oo lagu soo bandhigi doonaa Dugsiga Sare ee Grant, waxaa lagu tilmaamay in ay tahay, “xoojiyaha bedesha sumadda naafonimada caqliga laga soo bilaabo xukun nololeed oo go'doon ah loona beddelo nolosha suurtagalmimada dadka sida nidaam ahaan kala qaybsan ee Mareykanka.”

“Waxaan dooneynaa inaan hubinno in saameynta ugu weyn ay ku dhacdo dadka aan naafada lahayn,” ayay tiri Noelle Sisk, qof ku takhasusay ka-qaybgalka qoyska ee waaxda PPS ee Waxbarashada Gaarka. “Kuwaasi waa dadka sameeya carqaladaha ugu weyn, waa dadka noqon karaa saaxiibadeena ugu weyn.”

Degmadu waxay sidoo kale qabaneysaa shir fikradeed loogu talagalay [Student Success Act](#) (Xeerka Guusha Ardayga) ee loogu talagalay qoysaska ardayda naafada ah ama ku jira waxbarashada gaarka ah. Shirka Maalinta Oktoobar. 24, taasoo u furan dhammaan xubnaha bulshada, wuxuu bilaabmayaa 6 fiidnimo waxaana lagu qaban doonaa Dugsiga Pioneer.

## **Oktoobar waa Bisha Wacyigelinta Cudurka Dyslexia**

Waaxda Aadanaha [waxay Elizabeth Martin u magacaawday](#) Maamulaha Barnaamijka Dyslexia. Martin waxay leedahay waayo-aragnimo sannado ah iyadoo la shaqeynaysay ardayda dhib ku qaba wax akhriska iyo naafonimadda.

Degmadu waxay horumarin xirfadeed oo ku saabsan dyslexia siineysa macallin kasta oo ka tirsan fasalka-koowaad iyo fasalka-labaad sannadkan, waxayna aasaaseen koox la-talin bulsho ah oo la shaqeyn doontaa Xafiiska Waxbaridda & Waxbarashada si loo qorsheeyo xafladaha qoyska iyo bulshada.

“Waxaan aaminsanahay in taageerooyinkan dheeriga ah ay si weyn kor ugu qaadi doonaan dadaalladeenna aan ku caawinayno ardaydeena wax akhriska dhibka ku qaba in ay awoodooda meesha ugu sarreysa ka gaaraan,” ayay tiri Guddoomiyaha Guiddiga Amy Kohnstamm.

Degmadu waxay leedahay [websaydhka ilaha cudurka dyslexia](#) oo dhammaystiran.